# SHARCIGA NOTAAYADA

## CINWAANKA 1AAD
Qodobbo guud

### Qod. 1

Notaayayaashu waa saraakiil dawladeed ee loogu talagalay inay dadka nool u kala qoraan mucaamilaadka dhexmara iyo wixii dardaaran ah, si ay u sugaan aaminka dadweynaha, isla markaana xafidaan dhigaalka, bixiyaan nuqullada, caddeymaha iyo nuxurka qoraallada.

Notaayayaasha waxaa kale oo awood loo siiyey in ay:

1) saxiixaan soona bandhigaan cabashooyinka (rafcaannada) la xiriira arrimaha garsoorka ikhtiyaariga ah, ee ku saabsan heshiisyada mucaamilaadka ay dhinacyadu ku aamineen mid kasta oo ayagaas ka mida;
2) sameeyaan, dhaar kadib, qoraallda ku saabsan waxyaabaha la wada ogyahay ee la xiriira arrimaha madaniga iyo ganacsiga;
3) keyd ahaan u qabtaan qoraallada caamka, asal iyo koobi, qoraallada gaarka , waraaqaha iyo dokumentiyada, xataa haddii lagu soo saaray dibedda;
4) saxiixaan, suntaannadiiwaannada ganacsiga oo ay tilmaameen sharciyada madaniga iyo ganacsiga;
5) qabtaan qoraallada caddeynta khabiirrada la dhaariyey ee lagu sameeyomaxkamadda dibeddeeda, iyo tarjumada wixii caddeymo ama qoraallo ah;
6) soo saaraan nuqullo iyo nuxurdokumeentiyo, oo iyaga loo soo bandhigay iyo buugaag iyo diiwaanno ganacsi;
7) soo saaraan caddeynta in qofku weli nool yahay;
8) ku dhaqaaqaan, kaddib markii ay u xilsaaraan madaxda garsoorka:
    a) saarista iyo qaadidda moorarka/ilo-xir ku xusan sharciyada madaniga iyo ganacsga;
    b) tirakoobka (hantikoobka) xagga madaniga iyo ganacsiga;
    c) naadada iyo qaybinta-garsoor iyo hawlgallada loo baahan yahay ee la xiriira arrimahaas.

Notaayayaashu waxaa kale oo ay fulinayaan hawlaha kale oo sharciyadu u xilsaareen.

### Qod. 2

Hawsha xafiiska notaayaha lama socon karta shaqo kasta oo mushaar lagu qaato ama ay mushaar ku bixiso dawladda ama hayad guud, xirfadda qareenka ama wakiil, iyo sifaha ganacsade.

Waxaa axkaamtan ka baxsan, shaqooyinka suugaanta iyo cilmiga sayniska ee aan la tarraxin; shaqooyinka iyo xafiisyada hoos yimaada machadyada, hawlaha samafalka iyo kuwa la xiriira waxbarashada dadweynaha.

**CINWAANKA 2AAD**
Notaayaalka

**Cutubka 1aad**
(Tababarka notaaye)

**Qod. 3**

Diiwaanka leyliga/tababartayaalka waxaa haaya Golaha Notaayada.

Qofkii doonaya inuu ka mid noqoshada tababartayaasha notaaye waa inuu codsi u soo gudbiyaa Golaha Notaayada, asaga ooku soo lifaaqaya caddeymaha qoraallada caddeynaya in uu buuxiyey shuruudaha ku tilmaaman lambarrada 3 iyo 4 ee Qod. 1 ee sharciga lambar 8, ee 15 febaayo 1962, iyo weliba caddeynta oggolaanshaha notaayaha uu agtiisa tababarka ku qaatay.

Golaha Notaayada wuxuu go'aan ka gaarayaa diiwaangelinta, go'aankoodana waa inuu mar kasta ahaado mid sababeysan.

**Qod. 4**

Xoghayaha Golaha notaayada, isla marka la amro in qofka ka-dhursugaha ah in lagu qoro diiwaanka tababartayaashanotaaye, wuxuu go'aanka ku qorayaa diiwaan loogu talagalay.

Diiwaangelinta waa in la sameeyo, waana in lagumuujiyo tilmaamahiisa guud ee aqoonsi, goobta iyo taariikhda dhalashada iyo halka uu deggan yahay tabaartaha, taariikhda shahaaddada jaamacadeed ama dibloomka, iyo magaca notaayaha uu agtiisa tababarka ku qaatay.

**Qod. 5**

Waqtiga tababarka waxaa laga tirinayaa maalinta lagu qoro diiwaanka tababaryaasha.

Leyliga/Tababarku waa inuu dhab iyo joogto ahaadaa. Sí uu u sii wado tababarka, haddii uu hakad dhaco, tababartuhu waa inuu Golaha Notaayada u caddeeyo sababaha uu u joojinayo; iyo, marka sababahaas loo aqoonsado in uusan ku lug-lahayn (loo tiirineyn), waxaa loo tixgelinayaa tababarka uu horey u qaatay.

Tababarka waxaa loo qaadanayaa in uu kala go'ay, haddii tababartuhu ka baaqdo ama tegi waayo xafiiska notaayaha, xataa sí aan xiriir ahayn, muddo bil ah.

Sí uu u caddeeyo xiriir ahaanta tababarka, tababartuhu waa inuu u soo bandhogo Golaha notaayada, labadii biloodba mar, caddenta notaayaha uu tababarka agtiisa ku qaato. Xoghayaha Golaha ayaa caddeyntaas ku qoraya diiwaanka tababartayaalka.

Tababarka la sameeyey waxaa tababartaha notaaye shahaado ka siinaya Guddoomiyaha Golaha Notaayada.

**Qod. 6**

Tababartaha doonaya inuu tababarka ka sii wato notaaye kale agtiisa, waa inuu caddeyn ama codsi u gudbiyo Golaha Notaayada, asaga oo soo gudbinaya caddeyn ah inuu gutay waajibaadka tababarka ee waqtiga la soo dhaafay, iyo caddeynta oggolaanshaha notaayaha uu doonayo inuu tababarka ka sii wato.

Marka la oggolaado meeleynta cusub, xoghayaha Golaha Noyaayada wuxuu ku qorayaa

diiwaanka tababartayaasha.

**Cutubka 2aad**
(Tartanka magacaabidda notaaye)

**Qod. 7**

Magacaabidda notaaye waxaa lagu helaa, ayada oo loo galo tartan imtixaan. Tartanka kama qaygeli karaan dadka 55 jirsaday taariikhda la shaaciyey tartanka.

**Qod. 8**

Tartanka waxaa lagu soo saarayaa Xeer uu soo saaro Wasiirka Garsoorka. Xeerku waxa uu goynayaa tirada jagooyinka loo tartamayo, muddada ay ku egtahay soo gudbinta codsiga ka-qaybgalka, tixayaa tirada dokumentiyada laga rabo ka-qaybgalayaasha in ay keenaan ayaga oo muujinaya buuxinta shuruudaha lagu tilmaamay Qod. 1 ee sharciga lambar 8 ee 15 febraayo 1961, wuxuu dejinayaa axkaamta nidaamka iyo habka imtixaannada, wuxuuna cayimayaa maalmaha la qabanayo imtixaannada qoraalka.

**Qod. 9**

Wasiirka Garsoorka, kaddib markii uu sameeyo baaritaannada ugu muuqda inay habboon yihiin, wuxuu go’aan ka gaarayaa oggolaanshaha dadka doonaya ka-qaybgalka tababarka, wuxuuna ayagaas siinayaa ka-qaybgal shakhsi ahaaneed.

**Qod. 10**

Guddiga Imtixaanka, ee lagu magacaabayo Xeerka WasiirkaCaddaaladda, waxa uu ka kooban yahay:
1) hal garsoore oo guddoominaya;
2) Sarkaal ka tirsan Wasaaradda Garsoorka iyo Caddaaladda;
3) Bare maadooyinka sharciga ka dhiga Machadka Jaamacadda eeMuqdishu, ama nootaaye hawlgal ah.

Isla Xeerka kor ku xusan, Wasiirku wuxuu ku magacaabi karaa maamulayaal beddiil ah, wuxuunahawlaha xoghaynta u xilsaarayaa sarkaal ka tirsan kaalinta.

**Qod. 11**

Imtixaanku waa qoraal iyo tiraab.

Imtixaanka qoraalka waxa uu ka kooban yahay saddex jitaabo oo kala duwan oo ku saabsan macaamalo dhexmarta dad nool, dardaaran iyo racfaan laga qaadanayo go’aan laga soo saaray garsoor-dhexdhexaadin oo ikhtiyaari ah. Mawduuc kasta waxaa la weydiinayaa buuxinta iyo ka-shaqaynta su’aalaha imtixaanka iyosharraxaadda mabaadi’da aragti ee ku lug leh qaybo sharci ee la xiriira isla qoraalka.

Imtixaaka tiraabka ahi waxa uu ka kooban yahay saddex jitaabo ee kala duwan oo maadooyinka kooxkooxda ee soo socda:

a) qaanuunka madaniga iyo ganacsiga, ayada oo fiiro gaara loo yeelanayo maadooyinka sharciga oo looga hawlgalo xafiiska notaayaha;
b) axkaan ku saabsan sharciga nidaamka notaayada iyo kaydka notaayada;
c) Axkaanta ku saabsan cashuuraha macaamalooyinka.

**Qod. 12**

Xubin kasta, oo ka mida guddiga imtixaanka, waxay imtixaan kasta oo qoraal ama tiraabba u haysataa 10 dhibcood.

Tababartaha looma oggolaanayo in uu ka qaybgalo imtixaanka tiraabka haddii uusan keenin ugu yaraan 18 dhibcood imtixaan kasta oo qoraal ah.

Imtixaanka tiraabka waxaa loo qaadanayaa in laga gudbay, haddii tartamuhu uu 18 dhibcood ka keenokoox kasta oo ka midah  kooxaha maadooyinka.

**Qod. 13**

Guddigu, ayada oo lagu saleynayo wadarta dhibcood ee la siiyey musharrax kasta, wuxuu dejinayaa qaabka kala horreynta guud ee tartamayaalka lagu dhawaaqay inay u qalmaan.

Haddii ay jiraan tartamayaal dhibco isla eg helay, waxaa mudnaanta hormarinta leh kuwa horey ugu gudbay imtixaan tartan magacaabid notaaye, ayada oo kala hormarinta dhexdooda ah lagu saleynayo iskudarkacodadka ee uu mid kasta ka keenay imtixaanadaas midkood.

Haddii weli ay jiraan kuwo keenay dhibco isku mid, mudnaanta waxaa la siinayaa kan waqti ugu dheer ku dhammeeyey tababarka notaayenimo iyo ugu dambeyntii kan ugu da’da weyn.

**Qod. 14**

Go’aannada guddiga waa in la qaataa ayada oo ay ka qaybqaateen dhammaan xubnaha guddiga.

Hawlgallada tartanka waa in laga sameeyo maxdar, kaas oo ay saxiixayaan guddoomiyaha, xubnaha guddiga iyo xoghayaha.

**Qod. 15**

Wasiirka Garsoorka ayaa kormeerka ugu sare ku leh hawlgallada tartanka. Wasiirku waa uu ka soo qaybgeli karaa fadhiyada guddiga, mar kasta oo ay la habboonaato, waxaa kale oo uu awood u leeyahay in uu baabi’yo tartamada ay ka dhacaan wax is-dabamarin.

**Qod. 16**

Kala hor-marka tartamayaasha waxaa lagu ansixinayaa xeer ee uu soo saaro Wasiirka Caddaaladda, ka dib marka la hubiyo saxnimada hawlgallada tartanka. Kuwa ugu horreeya xulka, ayada oo la dhowrayo xadka tirada jagooyinka tartanka la geliyey, ayaa lagu dhawaaqayaa in ay tartanka ku guuleysteen.

Ayada oo ay la socoto kala horreynta tartamayaasha guuleystay, waxaa Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda lagu shaacinayo liiska goobaha notaaye ee maran ee loo qaybinayo kuwa ku guuleystay tartanka.

Kuwaas waxay, shan iyo tobanka maalmood ee xiga faafinta, Wasaaradda u soo gudbin karaan caddeyn nuxurkeedu yahay tilmaanta xarumaha ay doorbidayaan in loo xilsaaray.

Marka la gudbo muddada ku xusan faqradda hore, Wasiirku wuxuu magacaabayaa kuwa guuleytay asaga oo ku kala qoraya xarumaha ku jira liiska la faafiyey, ayada oo la tixgelinaayo doorbidkooda, lana raacayo qaabka kala horreynta. Haddii ay maqan tahay tilmaanta oo xarumaha ay doorteenna aan loogu qori karin, ayada oo loo raacayo halka ay kaga jiraan kala horreynta, Wasiirka ayaa, xafiis ahaan, iskiis ugu dhaqaaqaya u-xilsaaridda xarunta.

**Qod. 17**

Saameynta tartanka waa dhammaanee, marka la buuxiyo tirada jagooyinka ee lagu tilmaamay ogeysiiska tartanka lagu soo bandhigay. Sí kastaba ha ahaatee, waa awoodda Wasiirka Caddaaladda in uu magacaabo notaayayaal lagu beddelo kuwii tartanka ku guuleystay ee iska tanaasula ama aan la magacaabin sabab kasta oo ay tahayba, sidoo kale tartamayaasha lagu dhawaaqay in yihiin kuwa u qalma, sí waafaqsan habka kala horreynta.

Isku-beddelka waxaa loo sameyn karaa isla habkaas xataa marka tanaasulku uu yimaado magacaabista kaddib, ama marka notaayaha la magacaabay uu lumiyo xafiiska, xilkii uusan ku la wareejin muddada la filaayey.

Haddii ay dhacaan xaaladahaas, awoodda isku beddelidda lama isticmaali karo, marka la faafiyo Xeerka lagu soo bandhigayo tartan cusub.

**Cutubka 3aad**

(Qabashada hawlaha notaayada)

**Qod. 18**

Notaayahu, inta uusan gudagelin gudashada xilkiisa, waa:

1) inuu ku dhaarto, Guddoomiyaha Golaha Notaayada hortiisa, in uu “daacad u yahay Jamhuuriyadda Soomaamiliya iyo madaxiisa, sí daacad ah u dhowrayo shuruucda Dawladda, sí niyad iyo damiir ah u gudanaayo waajibaadka la xiriira xafiiskiisa”;
2) inuu Golaha Notaayada ka guddoomo shaabadda;
3) inuu ku qoro diiwaan loogu talagalay ee uu hayo xoghayaha Golaha Notaayada, saxiixiisa oo ay saaran tahay shaabadda kor lagu soo sheegay;
4) inuu guto waajibaadka kale ee ku xusan Qod. 20.

**Qod. 19**

Shaabadda lagu sheegay lambar 2aad ee Qod. hore waa in ay leedahay dhexroor ah soddon iyo shan millimeter, waana in ay taal astaanta qaranka oo ay ku wareegsan tahay qorriinka ereyga «Notaaye .....», ayada oo aan la raacin cinwaanno iyo tilmaamo kale.

Marka, notaayaha oo la beddelay awgeed ama sabab kale, ay noqoto in wax laga beddeloqorriinka, Golaha Notaayada waxaa uu soo saarayaa shaabad cusub, kaddib marka uu la noqdo tii kale.

Haddii ay shaabadda lunto, Golaha Notaayadu wuxuu bixinayaa mid kale, taas dhexdeeda, astaanta kasokow, waxaa lagu qorayaa calaamad khaas ah. Haddii shaabaddii hore dib loo helo, notaayuhu ma isticmaali karo, bal waa inuu degdeg ugu geeyo Golaha Notaayada.

Shaabadda lala noqday iyo tii horeba waxaa baabi'naya Guddoomiyaha Golaha Notaayada, asaga oo mid kasta saaraya calaamad istillaab ah, waana in loo xafido sida kuwa notaayayaasha shaqada ka tegay.

Inta aan la dhiibin shaabadda cusub, waa in raadkeeda la geliyo diiwaanka ku xusan lambarka 3 ee Qod. la soo dhaafay (hore).

Notaayaha waxaa ka reebban inuu raadsado shaabad kale ee ka baxsan tan uu siiyey Golaha Notaayada.

**Qod. 20**

Notaayuhu waa in uu, lixdan maalmood gudahood oo ka bilaabata taariikhda Faafinta Rasmiga Jamhuuriyadda ee lagu soo saaray xeerka magacaabidda, dhammeystiro habraaca lagu jideeyey Qod. 18aad, xafiiskana ka furo xarunta loo xilsaaray.

Muddadaas waxaa soo gaabin kara Wasiirka Caddaaladda, adeeg dadweyne awgiis, sida uu isla Wasiirku u dheereyn karo ilaa lixdan maalmood, sababo culus oo garowsho leh awgood.

Sí uuucaddeeyo furitaanka xafiiska, notaayuhu waa inuu Golaha Notaayada u geeyo caddeyn uu soo saaray Guddoomiyaha Degmada ee goobta, ka dib markuu helo macluumaadka loo baahan yahay.

**Qod. 21**

Axkaamta qodobbada 18 iyo 20 waa la dhowrayaa xataa marka ay dhacdo in notaayaha laga beddelo xarun loona beddelo xarun kale, inta ay yihiin kuwo lagu dabbaqi karo.

Notaayaha loo beddelay xarun kale ee notaayo waxa uu awood u leeyahayinuu xafiiska furto muddada uu sharcigu siiyey oo dhan ama uu Wasiirka Caddaaladda u dheereeyey, sida uu qabo Qod. 20aad, sí uu xilkiisa ugu guto xarunta cusub,

Awooddaas waxa ay dhammaaneysaa isla marka uu notaayaha isaga beddelay bilaabo gudashada xilkiisa.

**Qod. 22**

Sí uu u xaqiijiyo in xafiiska u shaqeeyo caadi iyo joogto, notaayuhu waa inuu xafiiskaka furaa xarunta loo xilsaaray, asaga oo dhigayo qoraallada, diiwaannada iyo buugaagta notaayada, shakhsi ahaanna xafiiska dadka ugu adeegaa maalmaha toddobaadka iyo saacadda uu gooyo Guddoomiyaha Golaha Notaayada.

Notaayuhu kama maqnaan karo xafiiska wax ka badan toban maalmood labadii bilood ee kasta, marka laga reebo sababo adeeg dadweyne, ama uu waajibaadkiisa ka gudanayey xafiisyada dawladda.

Haddii uu rabo in uu maqnaado waqti ka dheere, notaayuhu waa in uu fasax ka helaa Guddoomiyaha Golaha Notaayada, kaas oo siin kara muddo aan ka badnayn hal bil. Haddii uu doonayo waqti intaas ka siidheer, fasaxa ma bixin karo cid aan ahayn Wasiirka Garsoorka, markuu dhegeystotalada Golaha Notaayada.

**Qod. 23**

Notaayuhu waa in uu xafiiskiisa ku soo bandhigo jadwal muujinaya waxa kuqoran ereyga "Notaaye" shaabaddiisa.

Sidoo kale waa inuu soo bandhigo, sí dadweynuhu u arki karo, ogeysiis ay ku caddahay maalmaha iyo saacadaha xafiiska furan yahay, asaguna shakhsiyan uu shaqeynayo, iyo goobta ay dhinacyadu, maalmaha iyo saacadaha kale, ugu soo diri karaan akhbaartooda.

**Qod. 24**

Notaayuhuwuxuu ku khasban yahay inuu hawshiisa qabto mar kasta oo la weydiisto.

Notaayuhu, marka uu fulinayo hawlihiisa, marka ay jirto baahi culus oo degdeg ah, waxa uu toos u dalban karaa, masuuliyaddana qaaday, gacan-siinta ciidanka boliiska.

**Qod. 25**

Notaayuhu ma qaban karo hawlaha notaayaha:

1) haddii ay yihiin kuwo sharcigu sí cad u mamnuucay, ama ay sí cad uga soo horjeedaan anshaxa iyo nidaamka guud;
2) haddii ay, dhinac ahaan, uga soo qaybgelayaan xaaskiisa, qaraabadiisa ama xididkiisa tooska, derejo kasta, iyo kuwa la siman ilaa derejada saddexaad, xataa haddii ay ku soo dhex-galayaan sifo wakiillo, qayim ama maamulayaal;
3) haddii ay ku jiraan qodobbo khuseeya asaga naf ahaantiisa, xaaskiisa, ama qaar ka mida qaraabadiisa ama xididkiisa derejooyinka horey loo soo sheegay, ama dad uu asagu wakiil uga yahay heshiiska la geli doono, marka laga saaro marka qodobbo ku jiro dardaaran sir ah ee uusan qorin notaayaha, ama dadka lagu tilmaamay lambarkan, ee uu dardaarmaha u dhiibay dardaarankaas, oo moor saaran yahay.

Mamnuucidda ku xusan lambarrada 2 iyo 3 waxaa loo fidinayaa oo lagu dabaqayaa xaaska la furay iyo qaraabadeeda ama xaaska geeriyootay, derejooyinka horey loo soo sheegay, laakiin laguma dabaqayo xaaladaha ay jirto naado xaraash oo dadweynaha u furan.

**Qod. 26**

Notaayuhu ma sameyn karo qoraal ku saabsan macaamalo, marka macaamaladaas ay soo qaybgelayaan dad aan gacanla caawineyn iyo kuwa aan u idmaneyn habka uu sharcigu sí cad u jideeyey, sí ay ayagaas magacooda ama kan wakiilladooda ay waajib sharci ah ugu xambaaraan.

**Qod. 27**

Notaayuhu waa ka biyadiidi karaa shaqadiisa haddii dhinacyadu aysan u dhiibin canshuurta, xushmadda iyo kharashka qoraalka, haddii reebo marka ay khuseyso dad xaq u leh inlacag la'aan lagu caawiyo, amaba qoraallo dardaaran.

## Cutubka 4aad
(Beddelka Notaayayaasha)

### Qod. 28

Notaayaha waxaa xarun kale loogubeddeli karaa, xeer uu soo saaro Wasiirka Caddaaladda/Garsoorka, kaliya marka uu soo qaddimo codsi.

Lama codsan karo beddelka notaayaha aan ka hawlgelin xarunta loo xilsaaray, ugu yaraan saddex sano.

### Qod. 29

Marka ay bannaanaato xarun notaayo, Wasiirka Garsoorka waxa uu ogeysiis ku soo shaacinayaa Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda.

Marka muddo soddon maalmooda laga joogo shaacintaas/faafintaas, dadka doonaya xarunta bannaan waa inay codsi u gudbiyaan Golaha Notaayada, kaas oo, labaatanka maalmood ee xiga dhicitaanka muddada, codsiyada soo gaaray u gudbinaya Wasiirka, asaga oo raacinaya taladiisa.

Marka xarunta lagu kala magacaabayo dhowr qof oo doonaya, waxaa la tixgelinayaa, sí gaara, sida shaqada loogu soo kala horreeyey, wixii tillaabooyin anshax iyo edbin ee hore, natiijada iyo dhibcaha uu ku helay tartanka magacaabidda notaayennimo, shahaadooyinka sharci iyo hawlaha uu ka soo qabtay xafiisyo notaayada shabbaha.

### Qod. 30

Notaayaha, isla marka ay shaqada uga dhammaato xarunta laga beddelay, waa in uu nafahaantiisa ama asaga oo adeegsanaya wakiil gaara, waa in uu Kaydka notaayada ee gobolka, ku wareejiyaa qoraallada uu dadka u kala qoray, buugaagta iyo diiwaannada.

## Cutubka 5aad
(Luminta magacaabista notaayaha,
dhammaadka, joojinta shaqada notaayannimada)

### Qod. 31

Notaayuhu waa luminayaa magacaabista haddii, dhammaadka muddada ku xusan Qod. 20, uusan bilaabin hawshaa shaqada, uusanna gudan waajibaadka ku xusan qodobbada 18 iyo 20. Axkaantaan waxaa lagu dabaqayaa xataa marka notaayaha xarun laga beddelayo.

### Qod. 32

Shaqo ka sii-deynta notaayaha waxay ku timaadaa:

1) inuu gaaro da’ 70 sano;
2) inuu iskiis uga tago shaqada;
3) marka uu awoodi waayo inuu guto xilka xafiiskiisa sabab xagga maskaxda oo daciifta, ama waalli.

Haddii daciifidda maskaxda ama cudurka waallida uusan joogto ahayn, notaayaha xagga shaqada waa laga awood-tiri karaawaqtigo'an ee aan ka badnayn hal sano. Haddii ay dhammaadka muddada sannadka, uu ducfiga maskaxda ama cudurka waallida weli sii socdo, waxa ay noqonaysaa in shaqada laga siidaayo.

**Qod. 33**

Shaqo ka-qaadidda notaayaha waxay ku timaadaa:
1) haddii uu oggolaado shaqo, xirfad ku shaqeysto amaqabtodarajo aan la socon karinshaqada notaayada;
2) haddii notaayaha, cudurdaar la'aan, laga waayo xaruntiisa wax ka badanlaba bilood.

**Qod. 34**

Awood-tiridda, shaqo ka-joojinta iyo xil-ka-qaadidda notaayaha waxay ku yimaadaan xaaladaha ku xusan cutubka labaad ee cinwaanka lixaad.

**Qod. 35**

Luminta magaabista, shaqo ka-sii-deynta, shaqo ka-qaadista, xil-kaqaadista, caalo ka-dhigidda, awood-tiridda iyo shaqo kajoojinta notaayaha waxaa ku dhawaaqa Wasiirka Garsoorka (caddaaladda), asaga oo ku saaraya xeer, markuu soo jeediyo ama la dhegeysto Golaha Notaayada.

**Qod. 36**

Haddii ay geeri jirto ama ay si kama dambeys ah oo dhammaato shaqada notaayada, Maamulaha Kaydka gobolka ee notaayada waa inuu ku dhaqaaqo ligaxama mooor dul saaridda dhammaan qorallada buugaagta, diiwaannada iyo warqadaha notaayada looga shaqeeyo ee dhex-yaal xafiiska notaayaha, ama meel kaleoo aan loogu talgelin; marka la fuliyo hawlaha moor ka-qaadidda, waxaa qoraallada, buugaagta iyo diiwaannada la dhigayaa Kaydka.

Haddii ay jirto xaalad shaqo ka-joojin, awoodtirid ama awood-ka-qaadid, Golaha Notaayada ayaa go'aaminaya haddii qoraallada mucaamalaadka, buugaagta iyo diiwaannada ay tahay in ay sii oollayaan, sí kastaba, xafiiska notaayaha shaqada laga joojiyey, la awood tiray ama awoodda laga qaaday, ama sí ku meel gaara loo dhigaya Kaydka notaayahada ee gobolka.

**Qod. 37**

Shaabadda notaayaha dhintay ama shaqada ka tegay ama loo beddelay xarun kale, waa in la dhigaa xafiiska Golaha Notaayada, haddii uusan sameyn karin notaayuhu, waxaa hawshaas fulinaya Maamulaha Kaydka notaayada ee gobolka.

Xararka dushiisa waxaa lagu sameynayaa, ayada oo la raacayo amarka Guddoomiyaha Golaha Notaayada, calaamad sida ku cad faqradda afaraad ee Qod. 19, sidaas darteed shaabadda la isticmaaltiray, laakiin mar walibi la aqoonsan karo.

Sidaas oo kale waa in shaabadda, notaayaha sida ku meel gaarka shaqada u joojiyey, la dhigo xafiiska Golaha Notaayada, ilaa inta uu shaqo ka-joogsigaasi socdo.

**Cutubka 6aad**
(Caawiyayaal)

**Qod. 38**

Marka sababo la xiriira maqnaansho, joojin, awoodtirid iyo dhantaalnaan uu cudur keenay, ama caqabad kasta oo kale awgood, notaayuhu uu qaban waayo shaqadiisa, Wasiirka Garsoorka, ka dib marka uu weydiisto notaayuhu amaWasiirka iskiis xafiis haan, markuu dhegeysto ra'yiga Golaha Notaayada, waxa uu awoodaa in uu caawiye ka dhex magacaabodadka buuxiyey shuruudaha magacaabidda notaaye ama notaayayaasha ka shaqeeya xarumaha u dhow.

Caawiyuhu wuxuu shaqada notaayada ku qabanayaa oo waajibaadkiisa ku gudanayaa magaciisa iyo danta notaayaha shaqada laga xayiray, wuxuu qaadayaa dhammaan wixii waajibaad ah, laakiin ma laha xaq uu ku dhaxlo mustaqbalka.

**Qod. 39**

Dhammaan qodobbada ku saabsan notaayayaasha ayaa caadi u ah caawiyayaasha, hadba sida loogu dabaqi karo.
Shaabadda caawiyaha waa in uu ku qoran yahay ereyga «Caawiye notaaye».

Notaayaha la-caawiyaha ahi wuxuu leeyahay kala bar oo bar xushmadahalaga qaado hawlgallada uu fuliyey caawiyaha, ee asaga la siinayo inta hartay ee xaasilka.

**CINWAANKA 3AAD**
Qoraallada Notaayada

**Cutubka 1aad**
(Qaabka qoraallada notaayada)

**Qod. 40**

Notaayuhu ma qaban karo shaqada notaayada haddii aysan goobjoog ahayn dhinacyada, iyo, haddii sharcigu uusan sheeginwax ka duwan, laba markhaati ah.

Goobjoog ahaansha markhaatiyada loogama baahna qoraallad macaamilaadka ku xusan lambarrada 1 ilaa 8 ee Qod. 1aad, iyo weliba sugitaanka saxiixyada saaran waraaqaha ammarka xambaarsan (jeegagga iyo kambiyaalaha) iyo waraaqaha uu qiime ku cillan yahay ee ganacsga ee ku wareega saxiix dhabarka lagaga qoro.

Notaayaha ayaa leh inuu hago diyaarinta qoraalka macaamilada bilaw ilaa dhammaad, xataa marka uu u qoro qof uu kalsooni ku qabo; asaga ayaa leh inuu baaro rabitaanka dhinacyada, iyo inuu weydiiyo, ka dib markii uu u akhriyo qoraalka, inuu waafaqsan yahay rabitaankooda.

**Qod. 41**

Qoraallada macaamalooyinka dhexmara dad nool, marka laga saaro wixii hibo ah iyo heshiisyada guurka, dhinaca ama dhinacyada wax akhrin kara waxna qori kara, waxa ay awood u

leeyihiin, ayaga oo heshiis ku ah, in ay xagga qoraalkaka tanaasulaan markhaatiyo. Notaayuhu waxa uu heshiiskaas, sí caddaan ah, ugu xusaa bilawga qoraalka.

Haddii mid ka mida dhinacyada oo kali ah uu oggolaado ka tanaasulkaas, qoraalka waa in la sameeyo ayada oo ay goobjoog yihiin markhaatiyadu.

Qoraalka macaamilada ee loo sameeyey sí waafaqsan qodobkan, waa in loo qaataa dhan kasta in la sameeyey markhaatiyada oo goobjoog ka ah.

**Qod. 42**

Notaayuhu waa in uu naf ahaantiisa hubiyo aqoonsiga dhinacyada. Wixii taas ka duwan waa inuu ku hubiyo asaga oo adeegsanayo dad lagu kalsoonaan karo ee uu asagu yaqaan, kuwaas oo noqon karo xataa markhaatiyo.

**Qod. 43**

Markhaatiyadu waa in ay ahaadaan qaangaar, muwaadininta Jamhuuriyadda Soomaaliya ama shisheeye deggan Dalka, lehtasarruf buuxda eexuquuqda madaniga, danna aan ka lahayn macaamalada dulucdaqoraalka ah.

Markhaahti uma qalmaan indhoolayaasha, dhegoolayaasha, aan hadlin, kuwa notaayaha ama dhinacyada ay kala dhexeeyaan xiriirrada lagu tilmaamay Qod. 25, iyo kuwa aan aqoonin ama aan karin in ay saxiixaan qoraalka.

Kalsooni-sidayaashu waa in ay buuxiyaan shuruudaha loo dejiyey markhaatiyada, laakiin ayagu caqabad kuma aha xiriirrada iyo tayada lagu soo tilmaamay faqradda hore, aqoonis la’aanta iyo kari-waayidda saxiixa midkoodna.

**Qod. 44**

Qoraalka notaayada waxaa cinwaan looga dhigaa qaabka soo socda:

JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA.

Qoraalka notaayada waa in ay ku qoran yihiin:

1) tilmaanta sannadka, bisha, maalinta iyo goobta lagu qabtay qoraalka macaamalada ee ku qoran xuruuf fidsan;
2) tilmaamaha iyo xogta aqoonsiga notaayahaiyo tilmaanta xarunta uu ka hawlgalo;
3) xogta la xiriirta aqoonsiga, goobta iyo taariikhda dhalashada, halka aydanahooda ka maamushaan ama halka ay deggan yihiin iyo xaaladda dhinacyada, markhaatiyada iyo wakiilladooda.

   Haddii dhinacyada ama qaarkood ay qoraalka macaamalada ka qaybgalaan, ayaga oo adeegsanaya wakiillo, tilmaamaha horey loo soo sheegay waa la ilaalinayaa, laakiin xaggooda oo kaliya ma ahee, ee waxaa loo dhowrayaa xataa xagga wakiilladooda.

   Wakaaladda waa in ay ku lifaaqan tahay isla qoraalkamacaamalada, ama asal ama nuqul, haddii asalka ama nuqulka ayan ku jirin qoraallada notaayaha sharciyeeyey;
4) Caddeynta xaqiiqada aqoonsiga dhinacyada iyo xaqiijinta la sameeyey ayada oo la adeegsanayo dad yaqaan oo lagu kalsoon yahay;

5) Tilmaanta, ugu yaraan marka hore, taariikhaha oo lagu qoray xuruuf, lacagaha iyo tirada ashya'ada ah dulucda qoraalka macaamalada;
6) Calaamadeynta ashya'ada ah dulucda qoraalka sí aan loogu khaldin kuwa kale.

   Haddii qoraalku ku saabsan yahay hanti maguurto ah, taasi waa la calaameynayaa, intii suurtagal ah ayada oo la tilmaamayo dabeecaddeeda iyo baaxaddeeda, halka ay ku taal, iyo xuduuddeeda, sí loo xaqiijiyo waxa lagu aqoonsanay isla maguurtadaas;
7) Tilmaanta cinwaannada iyo qoraallada la dhex gelinayo qoraalkamacaamalada;
8) Xusiddain qoraalka macaamalada, qoraallada kale, iyo saamiyadala dhex geliyey qoraalka macaamalada, uu notaayuhu u akhriyey dhinacyada, ayada oo ay goobjoog yihiin markhaatiyada, haddii ay ka soo qaybgaleen;
9) Xusidda in qoraalka macaamalada yahay mid uu qoray notaayuhu ama ay qortay cid uu ku kalsoon yahay, ayada oo la raacinayo tilmaanta xaashiyaha uu ka kooban iyo bogagga wax ku qoran yihiin;
10) Saxiixa oo ay la socoto xogta ku saabsan aqoonsiga qof ahaaneed, ee dhinacyada, kuwa yaqaan dadka hor yimid ee notaayuhu ku kalsoon yahay, markhaatiyada iyo notaayaha.

    Dadka yaqaan dadka notaayaha hor yimid ee uu noytaayuhu ku kalsoon yahay waa ay bixi karaan ka dib markii ay sameeyaan caddeynta lagu qeexay lr. 4. ---- Markaas ay taasi jirto, waa in ay saxiix saaraan meel ku xigta caddeyntaas, notaayuhuna waa in uu xusaa.

    Haddii qaar ka mid ah dhinacyada ama qaar ka mida kuwa yaqaan dadka soo xaadiray notaayaha hortiisa ee lagu kalsoon yahay, aysan aqoon ama aysan kari karin in ay qoraalka saxiixaan, waa in ay caddeeyaan sababta u diideysa, notaayuhuna waa inuu xuso caddeyntan;
11) xagga qoraallada dardaaranka ah, tilmaanta saacadda uu dhacay saxiixa qoraalka. Caddeyntaas waxaa kale oo la sameynayaa, marka dhinacyadu weydiistaan, ama notaayuhu uu u arko mid habboon, xagga qoraallada kale;
12) Qoraallada ka kooban xaashiyo badan, inxaashi kasta cirifkeeda la saaro saxiixa dhinacyada, turjumaanka, markhaatiyada iyo notaayaha, marka laga reebo xaashida ay ku yaallaan saxiixyada kama dambeysta ah.

    Saxiixyo cirifeedka waa in la saaro xataa xaashi kasta ee ka mid ah qoraallada iyo cinwaannada la dhex-geliyey qoraalka, haddii laga reebo dokumentiyo sugan, rasmi ah ama diiwaangashan.

    Haddii dhinacyada ka soo qaybgalay oo yaqaanna, saxiixina kara, ay ka badan yihiin lix, beddelka saxiixyadooda, waxaa xaashikasta cirifkeeda la saari karaa saxiixyada qaar ayagaas ka mid ah, oo ay wakiisheen dhinacyada matala danaha kala duwan.

    Saxiix cirifeedka notaayaha ee xaashiyaha dhaxtaalka ah, looma baahna haddii qoraallka oo dhan uu asagu gacantiisa ku qoray.

**Qod. 45**

Saxiixa uu notaayuhu saarayo aakhirka qoraalka, waa in uu leeyahay raadka shaabaddiisa.

**Qod. 46**

Asalka qoraallada notaayaha waa in lagu qoraa khad aan tirtirmeynin, xuruuf waadax ah ee soocan, sí fududna loo akhrin karo, aan lahayn dulduleel ama meelo ban-bannaan oo aan ahayn jiitin sadareer, aan lahayn soo gaagaabin sixitaanno, wax-ka-beddelid ama wax ku-kordhin iyo xogatimana aan lahayn.

Haddiiba loo baahdo in laga saaro, la beddelo ama lagu daro ereyo, ka hor, saxiixa dhinacyada, kuwa yaqaan dadka soo xaadiray notaayaha hortiisa ee uu ku kalsoon yahay, turjumaannada iyo markhaatiyada, notaayuhu waa:

1) in uu tiro asaga oo xarriiq dhex-marinaya ereyada la rabo in laga gooyo ama la beddelo, sí mar waliba loo akhrin karo;
2) inuu wixii beddel iyo ku darid ah ku sameeyo dhammaadka qoraalka, si daraf-raacin ah, saxiixyada ka hor;
3) inuu ku xuso dhammaadka qoraalka iyo ka hor isla saxiixyada tiradaa ereyada la tirtiray iyo kuwa daraf-raaciska ah intaba iyo weliba akhrinta isla daraf-raacimaha, haddii la sameeyey ka hor inta aan la akhrin qoraalka.

Haddii kuwa lagu kalsoon yahay, ee aqoonaya dadka notaayaha hor yimid, ay tagaan inta aan la dhammeystirin qoraalka, sí waafaqsan lr. 10 ee Qod. 44, ma jiro wax beddel iyo ku-daris ah oo la sameyn karo ayaga oo aan goobjoog ahayn xagga wixii khuseeya aqoonsiga dadka ay ayagu xaqiijiyeen.

Wax ku-kordhinta iyo beddellada ay dhinacyadu rabi lahaayeen in ay sameeyaan ka dib marka ay saxiixaan ayaga iyo markhaatiyada, laakiin ka hor inta uusan notaayuhu saxiixin, waa in la fuliyo ayada oo la bixinayo caddeyn ku aaddan, akhrinta waxa lagu kordhiyey ama isbeddelka, in la xuso akhrintaas iyo saxiix cusub.

Tirtiridda, wax-ku-daridda iyo beddellaadda la sameeyey ee aan lagu oggolaan habka kor lagu soo xusay waxaa loo qaadanayaa kuwa aan dhicin.

**Qod. 47**

Qoraallada notaayada waa in lagu qoraa af-tayaani, ama ingiriis, ama carabi. Marka loo baahdo, qoraalka waa in laga hawgalo ayada oo uu ka soo qaybgalay turjubaan ay doorteen isla dhinacyada.

Turjubaanku waa in uu buuxiyo shuruudaha loo baahan yahay sí loo noqdo markhaati, lagamana dhex dooran karo markhaatiyada iyo aqoonsadayaalka uu notaayuhu ku kalsoon yahay. Tujumaanku waa inuu notaayaha hortiisa ku dhaarto in uu sí daacadnimo ah u fulinayo hawlaha xafiiskiisa, arrintaas oo lagu xusayo qoraalka macaamalada.

Marka ay dhinacyadu weydiistaan, wajiga hore ee asalka qoraalka ama hoostiisa waa in la dhigo mid ku tarjubaan luqad ay dhinacyada naftooda garanayaa, uuna sameyey turjubaanka. Tarjamada waa in ay saxiixaan dhinacyadu, turjubaanku, markhaatiyadu iyo notayuhu.

**Qod. 48**

Haddii qaar ka mida dhinacyada uu gebi ahaan ka maqan yahay maqalka, dhinacaas asaga ah waa inuu akhriyo qoraalka, arrinkaas waa in lagu xuso isla qoraalka.

Haddii dhegooluhu uusan aqoonin akhrin, waa in uu qoraalka ka soo qaybgalaa turjubaan, ee magacaabo Guddoomiyaha Maxkamadda Degmada ee degmada uu deggan yahay dhegooluhu, uu ka dhex magacaabayo dadka caadiyan la dhaqmo dhegoolaha oo isku fahamsiin kara tilmaan ama baaq.

Turjubaanku waa in uu buuxiyo shuruudaha looga baahan yahay qofka markhaatiga noqonaya, waana inuu maro dhaarta saxda ee ku xusan faqradda saddexaad ee Qod. 47. Turjubaanka waxaa laga dhex dooran karaa qaraabada iyo xididka dhegoolaha, isku marna ma gudan karo xilka markhaatiga ama damiinka.

## Qod. 49

Haddii qaar ka mida dhinacyada ay yihiin kuwo shibban ama dhegoole-shibbanaha ah, kasokowka-qaybgalka turjubaanka ee lagu jideeyey Qod. hore, waxaa la ilaalinayaa faritaannada soo socda:

— qof shibban ama dhegoole-shibbanaha ah, ee yaqaan akhris iyo qoris, oo waa in uu asagu naf ahaantiisa akhriyo qoraalka, kuna qoro qoraalkadhammaadkiisa, inta uusan saxiixin, in uu akhriyey una aqoonsaday in uu yahay mid waafaqsan rabitaankiisa;
— haddii uusan aqoonin ama uusan saxiixi karin, waxaa lagama maarmaan noqonaysa in afkiisa tilmaamaha uu fahmsan yahay xataa mid ka mida markhaatiyada, ama haddii kale uu soo dhexgalo turjubaan labaad, sí waafaqsan faqradaha Qod. hore.

## Qod. 50

Qoraalka notaayada waa wax kama jiraan, haddii laga reebo inuu leeyahay islaqiimaha maragfur ee uu leeyahay qoraalka gaarka haddii ay dhinacyadu saxiixeen, xaaladaha soo socda:

1) haddii notaayuhu qabtay inta aan la shaacin xeerka magacaabidda ama shaacinta joojinta shaqada, xataa sí ku meel gaar ah;
2) haddii notaayuhu u qabtay sí khilaafsan Qod. 25 lr. 2.
   Mukhaalafada ku xusan lr. 3 ee Qod. 25 waxa ay keeneysaa oo kaliya wax kama jiraannimada axkaamta lagu soo hadal qaaday isla lambarkaas;
3) Haddii aan la ilaalinin axkaamta qodobbada 40, 41, 43, 47, 48, 49 iyo lr. 10 ee Qod. 44;
4) haddii ay ka maqan tahay taariikhda, aysanna ku jirin tilmaanta goobta lagu qabtay hawsha qoraalka;
5) haddii notaayuhu uusan qoraalka u akhrin dhinacyada, ayada oo ay markhaatiyadu goobjoog yihiin, marka kuwan dambe ay ka soo qaybgaleen.

## Qod. 51

Marka lagu dhawaaqo in qoraalka notaayada yahay wax kama jiraan, ayada oo loo cuskanayoxukunmaxkamadeed oo kama dambeys noqday, Guddoomiyaha Golaha Notaayada, marka uu kaaliyaha hay'adda garsoorka soo saaray xukunkaka helo wargelinta nuxurka xukunka oo kooban, waxa uu amrayaa in xukunkaas lagu xusuusqoro cirifka asaka qoraalka notaayada.

Marka la soo weydiisto nuqul ka mida qoraalka, xusuus-qoritaanka kor lagu soo sheegay waxaa lagu minguurinayaa xataa nuqulka, ayada oo lagu caddeynayo dhammaadka ama cirifka qoraalkaas.

## Cutubka 2aad

(Haynta qoraallada notaayada, ee lagu haynayo, notaayaha agtiisa iyo Diiwaannada notaayada)

## Qod. 52

Notaayhu waa in uu si sax ah u haayo, meel ammaan ahnaku haayo, ayada oo la socdaanlifaaqyada la xiriira:

a) qoraallada uu ka shaqeeyey, marka laga saaro kuwa sharcigu reebay;
b) qoraallda agtiisa la dhigay ayada oo loo cuskanayo axkaan sharci ama codsiga dhinacyada.

Sababtan darted, waxa uu isigu xirayaa xirmo-xirmo iyo sí nidaam ah oo isku taxan, ayada oo qoraal kasta cirifkiisa lagu qorayo lambar tixane ah. Lifaaq kasta oo ka mida lifaaqyada wuxuu yeelanayaa isla lambarka tixanaha ah ee qoraalka, iyo xaraf ka mida xarfaha farta qoraalka oo kasoocaya kuwa kale.

Dardaarannada rasmi ah, ka hor dhimashada dardaarmaha, dardaarannada sirta ah iyo kuwa dardaarmuhu uu gacantiisa ku qoray ee la dhigay notaayaha agtiisa, furitaankooda iyo shaacintooda ka hor, waxaa lagu haynayaa galal kala soocan.

Dardaarannada rasmiga, ka hor dhimashada dardaarmaha, iyo marka ay codsato cid kasta oo dan ka yeelan kara, iyo kuwa kale furuitaankooda iyo shaacintooda ka dib, waa in ay ka wareejiyaan galka iyo diiwaanka khaaska ee qoraallada dardaaranka ah, una wareejiyaan kan guud ee qoraallada notaayada. Nidaamka tixanaha ah, oo ay tahay in dardaaran kasta lagu geliyo galka, waxaa la goynayaa laga bilaabo taariikhda maxdarrada kala duwan ee codsiga mid kasta ee loogu talagalay dardaarannada rasmiga; ee furidda dardaarannada sirta; iyo shaacinta dardaarannada uu dardaarmaha gacanta ku qoray.

**Qod. 53**

Notaayuhu cidna ma siin kara asalka qoraallada, marka laga reebo xaaladaha lagu sheegay Qod. 63, lagumana khasbi karo in uu soo bandhigo ama cid u dhiibo, haddii aanay ahayn xaaladaha iyo hababka sharcigu tilmaamay.

Haddii sharciyo kale aysan sheegin habka loo soo bandhigi karo ama meel loo dhigi karo, notaayuhu, inta uusan dhiibin, waa in uu nuqul sax ah ka sameeyo ee Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka ku hubinayo asalka. Waxaas waxaa laga sameynayaa maxdar, kaas oo nuqul ka mida lagu dhegjinayo qoraalka la soo bandhigayo ama la dhigaayo.

Waxaas oo dhan, notaayuhu waxa uu ku qorayaa diiwaanka, qaybta fiirooyinka gaarka, meel ku aaddan qoraalka uu khuseeyo.

Notaayuhu wuxuu asalka beddelkiisa dhigayaa nuqulka qoraalka, sí uu u yaal ilaa la soo celinayo kaas, iyo, haddii loo baahdo in la bixiyo nuqullo kale, waa in uu ku xuso dood-qoraaleedka (maxdarka).

**Qod. 54**

` Qofka qoraal-xogwarran u dhiiba notaayaha waxa uu xaq u leeyahay in loo celiyo haddii uu weydiisto, mar kasta waa inayfalka dhigaalka ka muuqato in uu u sameeyey dan asaga u gaar ah darteed.

Dib-u-celinta waxaa qoraal (maxdar) ka sameynaaya notaayaha wax loo dhiibay, haddii aysan ahayn waraaq dardaaran, waxaa gebi ahaan lagu minguurinayaa qoraalka la celinayo.

Qoraalka dhigaalka ahi waxa uu ku harayaa notaayaha agtiisa (xafiiskiisa); qoraalkaas, buugga, bogga fiirooyinka gaarka ah intaba waxaa lagu dhex xusuus-qorayaa dib-u-celinta dhacday.

**Qod. 55**

Notaayuhu waa in uu xafiiskiisa ku hayaa laba buug, mid la geliyo qoraallo macaamila ee dhexmarta dad nool, kaas oo loo isticmaalayo xataa xagga sharciga canshuuraha diiwaanka, iyo

midka kale oo la gelinayo qoraallada dardaaranka ah. Buugaagtaas waa in maalin kasta lagu xusuus-qoro, ayaga oo lahayn meelo banbannaan iyi sadar-dhaafyo, lehna qaab lambar tixan, ee dhammaan qoraallada la sameeyeyoo kala ah kuwo dhexmaray dad nool iyo kuwo dardaaranka ah, kuwa hore waxaa ku jira kuwa la bixiyey ayaga oo asal ah.

Buugga mucaamalaadka, tiir-qoraaleed kasta, waxaa ku jira:

1) lambarka tixanaha ahi;
2) taariikhda qoraalka iyo tilmaanta goobta lagu sameeyey;
3) dabeecadda qoraalka;
4) tilmaamaha aqoonsiga dhinacyada iyo xarunta danahood ama degaanka;
5) tilmaanta kooban ee waxyaabaha dulucda u ah qoraalka (macaamalada), iyo sicirka iyo qiimaha la xiriira;
6) xusuus-qoridda diiwaangelinta la fuliyey (sameeyey) iyo cashuurta laga bixiyey qoraallada la diiwaangeliyey;
7) xushmada notaayahaiyo;
8) wixii fiiro gaar ah.

Buugga loogu loogu talagay qoraallada dardaaranka waxaa lagu qorayaa oo kaliya tilmaamaha ku qoran afarta tiir-qoraal ee ugu horreeya.

Baalalka diiwaannada waxaa loo sadareeyey khaanad khaanad, waxaana notaayada ka reeban notaayaha in uu hal qoraal ka badan ku qorokhaanad kasta.

Tixanaha lambarrada isku xig-xiga ee lambarrada qoraallada oo lagu faray qodobkan iyo Qod. 52, waa la sii-wadayaa ilaa inta notaayuhu xilkiisa ku gudanayo isla xarunta, hddii uu u guuro xarun kale, notaayuhu waa in uu bilaabo lambarin cusub.

Notaayhu waa in uu saxiixaa xaashi kasta oo ka mida diiwaanka, buug-xirmeed kastan u sameeyo tusmo alif-beetood ee tilmaamaha guud ee dhinacyada.

**Qod. 56**

Diiwaannadaa waxaa notaayaha siinaya Golaha Notaayada.

Diiwaan kasta, inta aan la isticmaalin, waxaa xaashi kasta ka lambarinaya oo ka saxiixaya Guddoomiyaha Golaha, kaas oo xaashida kowaad ku caddeynayaa inta xaashi uu ka kooban yahay.

**Qod. 57**

Notaayaha waxaa waajib ka saaran yahay in uu, bil kasta, Kaydka Notaayada u diro nuqul ka mida diiwaannada ee ku kooban xusuus-qoridda qoraallada macaamalada uu sameeyey bishii hore.

Nuqulkaas waxaa saxiixaya notaayaha waxa uuna saarayaa shaabadda.

Marka bisha gudaheeda notaayaha uusan sameyn wax qoraal-macaamalo ah, waa uu gudbinayaa, mar kasta muddada kor lagu tilmaamay gudaheed, caddeyn ah inaan waxba la sameyn.

**Qod. 58**

Mararka notaayuhu, asaga oo fulinayaaxkaanta sharciga, uu diiwaankiisa hordhigo hay’adda awoodda u leh, asagu waa in uu isticmaalo gal dheeraad ee ka kooban xaashiyo lambarro leh, uuna saxiixay IlaaliyahaKaydka notaayada ee gobolka, sí uu ugu qoro tilmaamaha la xiriira qoraallada macaamillada uu sameynayo muddada dhaxtaalka, waase in uu ku minguuriyo mar allaale marka dib loogu soo celiyo.

Xaaladdaas waa in uu ku xuso qaybta fiirooyinka gaarka ee diiwaanka, ku hor qoran lambarrada la soo qaatay hortooda, xaashiyaha ka goonida ahna waa in ay ku lifaaqnaadaan isla diiwaanka.

Madaxda loo gudbinayo diiwaanka waa in ay isla diiwaankaas lagu tilmaamo, ayada oo lagu xijinayo lambarkii ugu dambeeyey ee lagu qoray, maalinta gudbinta iyo dib u soo celinta.

**Qod. 59**

Notaayuhu, buugaagta ka sokow, waa in uu haystaa diiwaan leh lambarro tixan ee uu maalin kasta ku qoro lacagaha iyo waxyaabaha qiimaha leh ee loogu aaminay sabab la xiriirta qoraallada macaamilooyinka hortiisa lagu guntay ama ka dhashay go'aanno ka soo baxay hay'adda garsoorka.

Diiwaanka la soo sheegay asagu waa in uu ka jaraa risiidyada, ee la siinayo dadka daneynaya, lacagaha iyo waxyaabaha qiimaha leh ee la soo sheegay.

Notaayuhu waa in uu diiwaangeliyaa badeeco kasta oo mar wada socota, wax yar kaddib marka uu fuliyo, hawlgallada uu ku fulinaayo xilka loo dhiibay.

Diiwaankaas waxaa bixinaya Golaha Notaayada waana in uu ahaado mid la lambariyey, la saxiixay loona xafido qaabka loo dejiyey, diiwaann la geliyo qoraallada macaamalooyinka.
Diiwaangeli ma laha lacagaha lagu aamino notaayaha ee lagu bixinayo cashuuraha la xiriira qoraallada macaamalaadka.

**CINWAANKA 3AAD**

Nuqullo, khulaasooyin iyo caddeymo.

**Qod. 60**

Notaayuhu, ilaa inta ay qoraallada yaallaan, kuna xafidan yihiin uuna qabto hawsha notaayada, waxaa uu xaq u leeyahay oo keliya in uu oggolaado inla fiirsado lana akhristo, bixiyo nuqullada, khulaasooyinka ee qoraallada uu sameeyey ama asaga agtiisa la dhigay.
Asagu ma oggolaan karo fiirsashada, iyo akhrinta qoraalka dardaaranka toona, mana bixin karo nuqullada dardaaranka, ilaa inta uu nool yahay dardaarmaha, haddiiba qofka weydiisanaya uusan ahayn isla dardaarmaha.

**Qod. 61**

Axkaamta Qod. 46 ee ku saabsan habka ay tahay in loo qoro asallada, loona sameynayo wax ka beddellada, wax ku-daridda ama iyo wixii tirtirid ah, waa kuwo ku dabaqmaya xataa nuqullada, khulaasadaha iyo caddeymaha.

Laakiin wax-ka-beddelka iyo wax-ku-daridda, ee loo sameeyey qaabka ku xusan Qod. lagu soo sheegay, waxaa lagu guurinayaa qoraalka, ee lama daraf-raacinayo.

**Qod. 62**

Notaayhu waa in uu dhammaadka nuqulka ku minguuriyo wakaaladaha raacsan iyo kuwa kale ee ku lifaaqan qoraalka asalka, haddii laga reebo marka, kuwaan dambe, ay ka tanaasusho cidda weydiisaneysa nuqulka. Marka ay jirto xaaladdan, notaayuhu waa in uu nuqulka ku xuso tanaasulkaas, asaga oo muujinaya taariikhda iyo dabeecadda lifaaqyada aan la guurinin.

Nuqullada, khulaasooyinka iyo caddeymaha waa in dhammaadkooda lagu muujiyo taariikhda la bixiyey, waana in uu notaayuhuku tasdiiqo saxiixa, shaabbadaha iyo caddeynta in nuqullada ay waafaqsan yihiin asalka. Haddii nuqulka, khulaasada ama caddeynta ay ka kooban yihiin xaashiyo badan, xaashi kasta waxaa cirifka ka saxiixaya notaayaha.

Qaababka la soo sheegay ka sokow, notaayuhu, xagga nuqullada uu bixinayo, waa in uu ilaaliyo, wixii qaabab kale ah oo ay dejiyeen sharciyo kale.

**Cutubka 4**

(Qoraallada asalka ahaanta lagu bixiyo iyo tasdiiqa saxiixyada).

**Qod. 63**

Xaaladaha ay cayimeen sharciyo kale ka sokow, notaayuhu wuxuu dhinacyada asalka ku siin karaa, oo kaliya, qoraallada xambaarsan wakaaladaha dacwad oogidda, ama wakaalado amaoggolaansho ama tasdiiqin ku saabsan qoraallada lagamamaarmaanka u ah fulinta hal hawl, ama igmasho la xiriirta isticmaalka xaq doorasho, xaaladaha ay cayimeen sharciyada siyaasadeed ama maamuleed.

Waxaa kale oo uu notaayuhu asal ku bixinayaa qoraallada ku xusan lambarrada 1, 4, 5, 6, iyo 7 ee Qod. 1, iyo qoraallada tasdiiqa ee ku xusan qodobbbada 40 iyo 65.

**Qod. 64**

Notaayuhu waxa uu qaab taar ama telefoon ku gudbin karaa khulaasada iyo nuxurka qoraallada.

Marka gudbintu ku kooban tahay khulaasada qoraalka, khulaasada waxaa sameynaya notaayaha, kaas oo ka qorayaa warbixin gaarah, ayada oo ay markhaatiyadu goobjoog yihiin.

Khulaasadaas, kor ku qoran, waa in notaayuhuku minguuriyo foomka taararka, asaga oo ka hormarinaya tilmaan xarfo ah ee lambarka diiwaanka ee qoraalka, waxa uuna saarayaa saxiixiisa iyo shaabadda.

Foomka taarka waxaa haynaya oo xafidaya xafiiska taarka ee diray, sí uu u dhigo, sannad marka ay ka soo wareegto taariikha, Kaydka notaayada ee gobolka.

Marka ay tahay gudbinta qaab telefoon ah, taas waa in ay kala sameeyaan isla markaana kala qabtaan laba notaaye, kuwaas oo ay tahay in ay aqoonsiyadooda iyo dulucda wargelinta ku dhaafaan xafiiska telefoonnada.

Notaayaha telefoonka helay waa in uu wargelinta, uu helay, u rogaa qoraal uuna ka hawlgalo la-xiriirinta notaayaha soo gudbiyey.

Notaayuha helay wax uu qoraalkaas ku dhex xafidayaa qoraalladiisa kale, nuqulna waa uu ka bixin karaa qoraalkaas.

Wargelinnada taar ahaaneed iyo kuwa telefoon ahaaneed, sida kor lagu soo xaqiijiyey, waxaa loo qaadanayaa in ay waafaqsan yihiin qoraallada asalka ilaa la helo caddeyn taas lid ku ah.

## Qod. 65

Sugnaanta saxiixyada saaran dhammaadka qoraallada gaarka ah iyo dhinacyada bogagga u dhexeeya warqadaha iyo kuwa dibadda uga baxa saxiixa kadib. Waa in uu ka koobnaadaa caddeynta saxiixa nootaayo guud, iyo haddii loo baahdo markhaatiyaal, iyo in taariikhda iyo goobta la xuso.

Marka saxiixyada dhinacyada iyo waraaqaha dhexe, way ku filan tahay in nootaayadu saxiixeeda ku darto.

Qoraallada gaarka ah oo nootaayadu ansixisay, haddii aan dhinacyadu wax ka duwan dooneneyn waa loo celin. Si kastaba ha ahaaatee waa in ay ka diiwaangeliyaan nootaayada ka hore si sharciga waafaqsan kharashka diiwaangelinta.

## Cutubka 5aad

(Qarashaadka iyo wixii kale ee xuquuqda nootaayada ah ama nooli)

## Qod. 66

Nootayadu waxa ay xaq u leedahay shaqa kasta oo ay qabato sida koobi, soo saarid ama shahaaddosiin, ama shaqa kasta oo ay qabato oo howsheeda ah in ay ka qaadato qarash qaybaha ay wax u qabaneyso, waxa la jira in la siiyo nooliga iyo xuquuqda wax qabad. Qarashka, xuquuqda iyo nooligaba waxa magacaabaya wasaaradda garsoorka iyo caddaaladda marka ay la tashato guddiga nootaayaaleyda.

Qarashka iyo xuquuqda wax qabad ee nootaayada ee la magacaabay bixintoodu waa waajib.

## Qod. 67

Haddii falku ka kooban yahay heshiisyo gooni gooni kala ah waxa jiraayo kharshyo mid walba u gaar ah.

Marka falku ka kooban yahay tiro heshiisyo ah oo isku meel ka soo jeedda ama soo kala dhex baxay, waxa loo qiimeynayaa in ay hal fal yihiin oo nootaayadu ka qaadeyso qarashka howlaha noocaas ah ku habboon, ama u xisaabiso in ay israacsan yihiin.

## Qod. 68

Marka falka la tuuro sabab nootaayada lagu eedeyn karo ama iyada oo xaqiiqadu tahay in nootaayo loo diri karo, ama koobbi loo diri karo oo aan soo saaridda ama shahaaddada aysan tusineynin habsami u socod xumo, wax qarash ama bixin nooli iyo xuquuq wax qabad ma jirayaan.

Xaaladaha kor lagu tilmaamay oo lagu daray beddelka dhib dhacay sida sharciga qabo, waxaa waajib ku ah nootaayada in ay bixiso qarashkii ay qaadatay qayb ka mid ah.

## Qod. 69

Marka laga reebo waxa ku qoran qodobka, 27 si dad la aqbalay kaalmo qaanuuni ah loo siiyo, qaybuhu waxa ay masuul ka yihiin si wada jir iyo sharci ah in ay qarashka xuquuq sharafeedka iyo nooliga nootaayada bixiyaan.

Nootaayadu waa diidi kartaa qof kasta in ay u dirto koobbi, qaybo, iyo shahaaddo ilaa qarashka dhan laga bixiyo, ama wey ka hayn kartaa, haddii doodi timaaddo ilaa kala aragti duwanaanta meel lala saaro guddiga nootaayaaleyda.

## CINWAANKA 4AAD

Golaha nootaayaaleyda

### Qod. 70

Golaha nootaayaaleyda waxa ay ku dhex yaalaan maxkamadda racfaanka Muqdisho.
Waxa uu ka kooban yahay:

a) Guddoomiyaha maxkamadda racfaanka Muqdisho, oo madax u ah;
b) Garsoore xafiiska wasaaradda howlaha guud ka socda, oo sannad walba xeer ilaaliyaha guud ee Qaranku soo magacaabo.
c) Nootaayo shaqeysa oo sannad walba wasiirka Garsoorka iyo cadaaladdu soo magacowdo.

Madaxa diiwaan gelinta maxkamadda racfaanka wuxuu u shaqeyn sida xoghaye.

### Qod. 71

Golaha nootaayaaleyda, marka laga yimaado howlaha qaanuunku ku waajibiyey waxa ay qabanayaan:

1) Kormeerka habsami u socodka shaqada nootaayada iyo si dhow in ay u hubiyaan howlaha nootaayada.
2) Koormeeridda wax qabadka nootaayaaleyda iyo gudashada wajibaadkooda.
3) La socodka iyo ilaalinta keydka la ansixiyey ee Gobollada si habeysan.
4) Soo saarid iyada oo laga jawaabayo dalabka maamulka ay khuseys, aragti ku saabsan howlaha keydka, waxyaabaha la ansixiyey iyo keydka nootaayada.
5) Sameyn iyo cusbooneysiin dowrka ganacsatada nootaayada iyo dhiiri gelinta nootaayaaleyda jecel shaqada nootaayada.
6) Dhexgelidda, si loo xalliyo khilaafaadka ka dhasha nootaayo iyo nootaayo kale ama dhan seddaxaad dhexdooda, ama ha noqoto soo celinta kaarar iyo qoraalo iyo waxyaabaha ku saabsan nooliga iyo qarashaadka, ama wax kasta oo la xiriira nootaayada.

### Qod. 72

Go'aannada Golaha nootaayaaleyda waxa lagu gaara aqlabiyad cod dheeri ah.

Xoghayaha Goluhu waxa uu dhameystiraa xusuus qoridda shirka Golaha, waxa uu ilaaliyaa dhammaan qoraallada la xiriira shirka, wuxuuna diraa koobiyo ogolaansha madaxa Golaha kadib.

Natiijada gunaanadka shir waxa saxiixa madaxa Golaha iyo xoghayaha.

### Qod. 73

Waxa kale oo Golaha nootaayaaleyda mas'uuliyaddooda ka mid ah; howlaha hay'adda anshaxa iyo edbinta nootaayaaleyda.

Meelmarinta ciqaabaha digniinta, kormeerka, iyo ganaaxa waa mas'uuliyadda Golaha nootaayaaleyda.

## CINWAANKA 5AAD

Keydka nooyaayada goboleed

### Qod. 74

Xafiis nootaayo ayaa laga sameeyay maxkamadda gobol kasta.
Keydiyaha keydka nootaayada gobolka waa la taliyaha koowwaad ee maxkamadda gobolka.

### Qod. 75

Keydka nootaayada gobolka waxaa la dhigaa oo lagu keydiyaa:

1) Shaqooyinka iyo qoraalada nootaayooyinka dhinteen ama si kama dambeys ah ama ku meel gaar ah shaqada u joojiyey, ama loo wareejiyey meelo kale oo hoos taga gobol kale.
2) Koobbi qoraalada yaalla keydka ku tilmaaman qodobka 57.
3) Qaybaha telegaraamyada iyo muxaadarooyinka codadka duuban, ee ku xusan qodobka 64.

Buug hayuhu waxa uu mas'uul ka yahay ilaalinta iyo xafididda dhammaan qoraallada la dhigo keydka. Waxaana uu ilaaliyaa habsami u shaqeynta keydka iyo wajibaadka saaran nootaayaaleyda xagga keydka, waxaa kale oo uu guddiga nootaayaaleyda la wadaagaa gefafka ay nootaayaaleydu ogaadeen.

### Qod. 76

Marka la dabaraaco xafididda qoraallada asalka ah iyo diiwaanka, buug hayuhu waxa uu si toos ah u fatashayaa una hubsanayaa tirada keydka yaalla iyo caddaymahooda.
Shaqadaan inta lagu jiro, buughayuhu waxa uu diyarinayaa warbixin gaara, oo uu u dirayo koobbi ka mida guddiga nootaayaaleyda.

### Qod. 77

Buughayuhu waxa uu oggalaanyaa in la fatasho lana akhriyo qoraallada la dhigay keydka nootaaya goboleedka, waxa uu soo saaraa koobiyo fulin iyo weliba waraaqaha iyo shahaadooyinka.
Buughayuhu waxa uu la soconayaa dib u soocelinta dukumentiyada iyo furidda iyo fidintooda dardaaramyada lagu xafiday keydka., waxana uu fiirinayaa sida wax u dhacaya iyo axkaamta la xiriirta.
Waxa kale oo waajib ku ah diiwaanhayaha in uu dhowro shuruucda ku saabsan noocayada howlaha ansixinta, iyo tirada shaqo ee nootaayada.
Marka ay timaaddo howlaha ansixinta, diiwaanhayuhu waxa uu qaadanayaa mas'uuliyadda ansixiyayaasha dartood, saga hoos u dhigidda qarashka barkii iyo xuquuq kasta oo dheeri ah.

### Qod. 78

Keydka nootaayo goboleed kasta waxaa loo samaynataa laba tusmo guud oo loo taxayo habka iskuxigga xarfaha alifba'da, mid waxa u gaar ah nootaayada, waxaana lagu muujinayaa xogta nootaayayaasha oo ku xusan dukumentiyada, taariikhda midda ugu horraysay ee la qoray iyo midda

ugu dambesay; tusmada kale waa mid tilmaamaysa xogta qaybaha kale ee ka qaybqaatay hawsha. Kan koowaad waxa xataa uu tusinayaa khaanadaha lagu xafido dokumentooyinka nootaayo kasta, kan labaad waxa uu sheegayaa tayada, nooca iyo taariikhda la howlgeliyey, sidoo kale iyo magaca notaayaha ansixiyay ama diyaariyay warqadda.

## CINWAANKA 6AAD

Kormeerka nootaayayaasha iyo keydka. Howlaha fatashidda, ciqaabaha edbinta iyo habka loo fuliyo.

## CINWAANKA 1AAD

(Kormeerka iyo fatashidda)

### Qod. 79

Wasiirka Garsoorka iyo Cadaaladda waxa uu si foojigan ula soconayaa nootaayayaasha iyo keydka nooyaaya goboleedyada waxa uuna awood u leeyahay in uu sameeyo fatashidda ay la noqotay in ay muhiim tahay.

Kormeerka waxa ku shaqa leh Golaha nootaayaaleyda iyo Garyaqaanka Guud ee Qaranka.

### Qod. 80

Daba galka howlaha fatashidda ee ku tilmaaman qodobka hore waa shaqada Madaxa Golaha nootaayaaleyda, ama la taliye uu u diro.

Warbixin gaar ah oo ku saabsan fatashidda, ama koobbi ka mida ayaa loo dirayaa Wasiirka Garsoorka iyo Caddaaladda.

## Cutubka 2aad

(Ciqaabaha edbinta)

### Qod. 81

Ciqaabaha nootaayaaleyda aan waajibaadkooda gudan waa:

1) degniin;
2) faafreeb;
3) ganaax;
4) shaqa ka joojin;
5) cayrin.

Ciqaabahaan waxaa loo saarayaa si ka madax bannaan ciqaab kasta oo qaanuun kale saarayo iyo xataa haddii uusan keeneynin baab'inta ficilkaan.

### Qod. 82

Digniintu waxa ay ka kooban tahay nootaayada oo loo canaanto dhowrid la'aanteeda habka shaqada dartiis, iyo u sheegid in aysan markale dib ugu laaban.

Fafreebku waa ogeysiis canaaneed oo rasmi ah nadaam la'idooda darteed, waxaa waajib ah in koobbiga tallaabadaas uu ku dhegsanaado muddo shan iyo toban maalmood ah, afafka hore ee keyd goboleedka nootaayada.

**Qod. 83**

Waxa lagu ciqaabayaa ganaax gaaraya 40 ilaa 200 Sh. So. ah nootaayada ka hortimaada xeerarka tirsigoodu yahay: 2,3,4,5,6,7 & 9 ee qod.44 iyo qodobbada 46,53,57,63 & 65 ee xafididda qoraallada iyo xafididda keydka loo noqdo ee ka hor imaanaya xukunnada labada qodob ee 52 & 55.

Waxaa lagu ciqaabayaa ganaax u dhexeeya 200 ilaa 500 sh. So. ah Nootayada ka hortimaado xeerka faqraddiisa 22 ee tirsiga: 1, 8, 10, 12, ee qodobka 44. Iyo faqrad qodobka 60.

Waxaa lagu ciqaabayaa nootaayada ganaax u dhexeeya 500 ilaa 1000 sh. So. ah. haddii ay soo saarto koobbi ama shahaaddo ama qaybo ka mida inta ay ku jirto shaqo ka joojinta ama awood la'aanta.

**Qod. 84**

Waxa lagu ciqaabayaa iyada oo shaqadana laga joojinayo bil ilaa lix bil nootaayadii:

1) ay soo noqnoqoto in ay dembi gashay sida qod. 22 qabo;
2) ka hortimaada shuruucda qodobbada 47, 48, 49;
3) dayacda keydka oo aan xafidinin dukumentiyada ay soo saarto iyo kuwa la dhigo;
4) aan dhowreynin keydka ku xusan qodobka 55;
5) dembi ku soo laablaabato dembiyada lagu tilmaamay lambarrada 1, 8, 10, 11, 12, ee qodobka 44;
6) ka hortimaada howlaha fatashidda sida uu qabo qodobka 79, ama suurta gelinweyda fatashidda.

Waxaa lagu ciqaabayaa nootaayada ka hortimaadda xukunnada faqradda koowaad ee qodobka 24 iyo qodobada 25, 40, 41, iyo 42. in shaqada laga joojiyo lix ilaa hal sano.
Shaqa ka joojintu waxa ay gaarsiineysaa hoos u dhac ku yimaada mudnaanta xubinnimada Golaha nootaayaaleyda.

**Qod. 85**

Waa laga joojiyaa si sharci ah xaq u lahaanshaha shaqo notaayada amar soo qabasho ama xirid loo soo saaro.

Waxaa la caddeyn karaa awood darrida nootaayada ku socdo xukun dambi mid ka mida dembiyada ku xusan faqradda ugu dambeysa ee qodobka 86.

Hey'adda garsoorka ee dacwad ku oogeysa nootaayo wax ay ku qasban tahay in ay ku wargeliso Golaha nootaayaaleyda iyada oo u sheegeysa magaca dambiga lagu dacweeynayo.

**Qod. 86**

Waxa lagu ciqaabayaa cayrid nootaayada:

1) Sii wadata shaqadeeda iyada oo la hakiyey ama laga joojiyey shaqada; marka laga reebo faqradda ugu dambeysa qodobka 83;
2) Ka tagta degaankeeda waqtiga ay jiraan cudurrada faafa ama lays qabadsiiyo;
3) Aan musuq awgiis u dhowrin diiwaannada iyo dokumiintiyada ay soo saarto iyo kuwa la dhigo;

4) Lagu helo lunsasho, musuq, wax isdabamarin, xatooyo, si qaldan u qaadasho guud, been-abuur iyo waxyaabaha laga reebay xafiisyada guud, ama kormeerka gaarka ah ee taliska booliska.

**Qod. 87**

Marka laga reebo go'aanno si gaara loo xusay, qaanuunka ayaa saarayaa notaayada wixii ku saabsan qoraallada oo qawaaniintu ku qasbeyso xafididdooda, isla ciqaabtaas lafteeda waxaa lagu saarayaa heysasho aan sharci ahayn, hufnaan la'aan iyo maqnaanshaha asalka qoraallada.

**Qod. 88**

Haddii xaqiiqda eedeymaha nootaayada leedahay xaaladaha fufudeeya ciqaabta joojinta iyo ganaaxa lacageed waa laga yareyn karaa ilaa barka ganaaxa ugu hooseeya, waxaana lgu baddali karaa ka dhaafidda ciqaabta joojinta iyo digniinaha kormerka.

**Qod. 89**

Waxa markasta soo noqnoqonaya in dembiyo cusub dheceen shan sano ee la soo dhaafay dembiyo hore loogu xakumay ka dib.

**Qod. 90**

Waxaa laga qaadayaa nootaayayaasha tallaabooyin edbin ee ku aaddan xadgudubyadooda ay xad gudbeen muddo saddex sano ah laga bilaabo marka xadgudubku dhacay, xataa haddii ay jiraan howlo la fulinayo.

**Qod. 91**

Waxa lagu ciqaabaa nootaayada sidii ay doontaba ha noqotee ka tanaasusha edebta wanaagsan ee nolosha guud ama gaar karaamadeeda ama sumcaddeeda, ama karaamada dadka caamka ah iyo sumcaddooda, ama qarash hoos u dhigid iyo xuquuqda lahaanshaha taas oo sameyneysa tartamayaal aan sharci ahaeyn waxa lagu ciqaabaa shaqa ka joojin muddo gaareysa hal sano, iyo in la casilo haddii xaaladdu daran tahay. Shaqa ka joojinta waxa mar walba la saarayaa nootayada kadib markii laba mar hore loogu xukumay casilaad ku xadkudubka qodobkaan dartiis, oo uu mar kale xadgudub sameyso.

**Cutubka 3aad**
(Dacwadda edbint)

**Qod. 92**

Goddoomiyaha golaha nootaayaaleyda marka uu ogaado xaqiiqda la xiriirto dembi ku soo oogidda nootaayada ee ciqaabta edbinta, waxa uu ogolaadaa baaritaannada uu u arko in loo baahan yahay, qoraalna waxa uu u diraa golaha nootaayaaleyda golahaas oo go'aaminaya haddi ay tahay in ciqaabta dacwaddu sii socoto iyo inkale.

Haddii uu goluhu go'aamiyo in dacwadda la sii wado Guddoomiyuhu waxa uu si rasmi ah warqad ugu qoraa nootaayada asaga oo ku wargelinaya si cad denbiga lagu soo oogay.

Dhammaadka labaatanka maalmood, laga bilaabo maalintii warqadda faqrada kore lagu xusay gaartay, nootaayadu waxa ay keeni kartaa caddeymo qoraal ah oo ay isku difaaceyso.

Waqtiga kor ku xusan marka uu dhammaado baaritaankuna soo idlaado, haddii la doono golaha nootaayaaledu waxa ay go'aamin karaan in la dhegeysto nootaayada haddii ay sidaas dalbato.

**Qod. 93**

Haddii golaha nootaayaaleyda aan u arag in nootayada eedaysan dembiga laga dhaafo waxa ay saarayaan ciqaabta ay u arkaan in ay ku habboon tahay, haddii ay howshooda ka mid tahay, iyaga oo wargelinaya nootaayada iyo wasiirka garsoorka iyo caddaaladda.

Haddii caqaabta ay u arkaan in ay ku habboon tahay ay heerkooda ka sarreyso, golaha nootaayaaleyda waxa ay soo jeedin sababaysan u gudbinayaan wasiirka garsoorka iyo caddaaladda, waxa kale oo isla markaas loo dirayaa wasiirka koobbi dhammaan dukumiintiyada khuseeya anshaxmarinta.

Wasiirka waxa uu soo saarayaa wareegto uu ku caddeynayo ciqaabta ku habboon iyo nooceeda isaga oo aan ku qasbaneyn in uu qaato soo jeedinta golaha. Koobbi ka mida wareegtada wasiirka ayaa loo dirayaa nootaayada iyo golaha nootaayaaleyda.

## CINWAANKA 7AAD

Amarro kala duwan oo kama dambeys ah

**Qod. 94**

Si ka soo horjeedda tallaabooyinka maamulka iyo tallaabooyinka kama dambeysta ah ee edbinta ka dhalatay dacwada, waxa u furan nootaayada in ay racfaan u qaadato maxkamadda sare soddon maalmood gudohooda taariikhda xukunku ku dhacay.

**Qod. 95**

Keydka nootaayaaleyda sida uu qabo qodobka 110 ee nadaamka qaanuunka hadda jira ee la tirtiray.

Diiwaanhayaha keydka la tilmaamay ayaa u gudbinaya dukumiintiga iyo qoraallada la dhigay diiwaanhayaha keydka nootaaya goboleedka Banaadir ka hor 31 disembar 1962.

**Qod. 96**

Waa la tirtirayaa dhammaan shuruucda ka hor imaaneysa xeerka hadda jira ama aan la socon karin.

**Qod. 97**

Kharashaadka la xiriira ka shaqeysiinta golaha nootaaya goboleedka waxa la saarayaa wasaaradda garsoorka iyo caddaaladda.

**Qod. 98**

Nadaamka howlaha la xiriira nootaayayaasha iyo diiwaanka keydadka waa masuuliyad u gaara wisiirka garsoorka iyo caddaaladda.

**Qod. 99**

Xeerarkan hadda jira waxa ay ka howlgelayaan dhammaan dhulka dowladda maalinta shan iyo tobanaad kadib marka uu Faafinta Rasmiga ah ku soo baxo.

Muqdisho, 2 maarso 1962.

Adan Cabdulle Cusmaan
Wasiiraka koowaad
Cabdirashid Cali Sharma'arke
Wasiirka Garsoorka iyo Caddalaadda
Maxamud Axmed Maxamed.